**Kasoo warbixinta arrimaha Hadda ka Socda Somaliland**

2025-044-FB-UA, 2025-045-FB-UA, 2025-046-FB-UA, 2025-047-FB-UA

# Soo koobida

## Soo koobida

Gudida Kormeerka waxa ay ogaadeen in nidaamyada Meta aanu ilaalin madax banaanida saxaafada iyo ka warbixinta danaha shacabka ee Jamuuriyada iskeeda ugu dhawaaqday goosiga ee Somaliland. Gudidu waxay naqdiyeen ka saaritaanka Facebook ee bogga iyo afar boosti xogteed oo ka hadlaysay arrimaha Somaliland, taas oo ah deegaan lagu cadaadiyo saxaafada. Gudidu waxay qaadhaceen go'aanka Meta ay ku xidheyso bogga iyo afarta boosti. Meta waa inay hormarisaa nidaamyadeeda kahortaga khaladka iyo nidaamyadeeda rafcaanka si ay u xoojiso in boggaga saxaafada iyo xogtiisa aan si khaldan looga saarin.

## Ku Saabsan Kiisaska

Afarta kiis ee Gudidu u tixgelisay inay qeyb ka yihiin go'aankan waxa uu la xiriiraa bogga Facebook ee ka hadla wararka iyo waxyaabaha ka dhaca Somaliland. Bogga waxa uu isku qeexaa inuu ka hadlo ka shaqeysiga saxaafadda oo waxa uuna leeyahay qiyaastii 90,000 oo qof oo raacsan.

Janaayo 2025, afar xog baahino ayaa lasoo dhigay bogga. Laba xog baahino waxay ku saabsanyihiin safarradii dhawaa ee siyaasadda dibadda Madaxweynaha Somaliland, Abdirahman Mohamed Abdullahi oo waxaa ku lifaaqnaa sawirro wata qoraallo sheegaya in tabinta warbaahinta laga mamnuucay. Laba xog baahino kale ayaa la xiriira xaflad dadweyne oo rasmi ah oo ka dhacday Somaliland iyo shir siyaasadeed, oo ay ku jiraan qoraalo sharaxaad wata. Bogga, boostiyada iyo qoraalada waxay dhamaan ku qornaayeen luuqada Somaliga.

Kadib markii isticmaaleyaal ay soo sheegeen boggaas, qofka dib u eegista sameeya ayaa ogaaday in bogga uu jabiyay Akhlaaqda Nacaybka siyaasaddeeda udagsan oo waxa ay ahayd "in aan la daabicin" tusaale ahaan, boggii laga saaray. Dib u eegaha ayaa sidoo kale wuxuu saaray afar macluumaad kuwaas oo iyaguna ku xad gudbay isla xeerkii. Akoonka maamulka bogga ayaa xadidaad helay.

Maamulaha bogga ayaa racfaan ka qaatay go'aanka Meta ee ay kaga saarayso bogga, iyo si gaar ah, ka saaritaanka afar boostiyo. Rafcaanada ku saabsan afarta boostiyo waxaa dib u eegay lix qof oo bini'aadam ah, oo uu ku jiro qofkii horey u gaaray go'aanka, waxaana la qaatay go'aannadii hore. Nidaamyada Meta may siinin mudnaanta go'aanka bogga ee naqdinta oo rafcaankana si toos ah ayaa loo xidhay, iyada oo boguna sidaa u ahaanayo mid aan daabacnayn. Maamulaha bogu waxa uu rafcaan ka qaatay Gudida.

Ka dib markii ay Guddiga u doorteen kiisaska in dib loo eego, Meta waxay dib uga noqotay dhammaan go'aanadeedii hore waxayna soo celisay boggii iyo afartii qoraal, iyadoo sidoo kalena ka qaaday digniintii. Gudidu waxay ogaatay 10 rafacaan oo kale oo Somaliland ka yimid oo la xidhiidha masixita xogta, taas oo ay Meta xaqiijisay inay ahayd khalad oo ay dib usoo celisay.

Inkasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay u aragto inay tahay gobol ka mid ah deegaanka, Somaliland waxay ku dhawaaqday madaxbannaanideeda sannadkii 1991, balse weli ma helin aqoonsi caalami ah. Sida ay sheegeen ururrada u dooda xorriyadda saxaafadda, Soomaaliya waa mid ka mid ah dalalka ugu khatarta badan dunida ee suxufiyiinta, iyadoo ay ku jirto Somaliland, halkaas oo masuuliyiintu cadaadis xooggan saaraan warbaahinta maxalliga ah oo si caburin ah ula dhaqmaan.

**Xogta La Ogaaday**

Gudidu waxay ogaadeen in ayna jirin wax cudurdaar ah oo ku yaala siyaasada xogta Meta oo lagu xidhay laguna masaxay boga Facebook-ga iyo qoraalada. Ma jiro wax ku yaalay bogga oo ahaa xad gudub oo masixiduna waxay ahayd gebi ahaanba mid aan cadaalad ahayn. Masixitaanka xogtu waxay si aan joogto ahayn u khilaafsan tahay waajibaadka Meta ee xuquuqul insaanka.

Madalaha dhijitaalka ah, sida Facebook, waxaa weeye meelo daruuri ah u ah saxaafada madaxa banaan ee jooga Somaliland ay ku baahiyaan wurarka iyo kula xidhiidhaan dadka ku xidhan ee deegaanka iyo heer caalami. Ka saaritaanka xogta oo aan cadaaladu ahayn waxa uu xad gudub daran ku yahay xoriyatul qawlka deegaanka oo waxa uu gacan ka gaystaa xaalada cakiran ee saxaafadu ku jirto. In aan bogga la daabicin waxay leeyihiin saamayn wayn, gaar ahaan saxaafada ayay ku leedahay, oo markaa go'aamada noocaas ah waa in si wanaagsan loo eegaa kahor inta aan la dhaqan gelin.

Nidaam eegitaan, oo ka kooban Dib-u-eegista Guud ee Heerka Labaad (GSR) iyo Dib-u-eegista Hay'adaha Xasaasiga ah ee Heerka Labaad (SSR), kuwaas oo ahayd inay calaamadeeyaan kiisaskan, si ku filan mudnaanta umay siinin in boggu uu ku hawlnaa warbixino madax banaan. Laba kale ee nidaamyada kahortagga khaladaadka ayaa ahayd in laga shaqaysiiyo laakiin si dhammaystiran looma adeegsan mise gebi ahaanba lama dabaqin.

Ku guuldaraysiga Meta in ay ku darto bogga qodobada nidaamkeedaa naqdinta ee mushkiladaha qaabaysan ee balaadhan ee iman kara. Gudidu waxay si gaar ah uga walaacsan yihiin in nidaamku uu kahor istaagayo dhaqan gelinta aanu mudnaanta siinin danaha shacabka ee saxaafada ku shaqaysa luuqada Somalilga. Tani waxay si gaar ah u khusaysaa kadib bayaankii Meta ee Janaayo ee in qaabkeeda cusub ee tafatirta xogta ay yeelato "hadal badan iyo khaladaad yar." Barnaamijka Diiwaan Gelinta Wariyaha ee Meta, kaas oo siiya badbaado amni oo badan, laakiin kuma jirto Somaliya, oo ay ka mid tahay Somaliland, oo waxaa laga yaabaa in ay wax ka qaban lahayd kiiskan.

Meta kuma laha hal ilo oo dhexe oo diiwaangeliya siyaasadaha nuxurka ee khuseeya bogagga, taasoo dhalinaysa dhibaatooyin la xiriira mushkilaadaha caddaynta iyo daahfurnaanta.

**Go'aanka Gudida Kormeerka**

Gudida wuxuu qaadhacay go'aanka Meta in aysan daabicin bogga iyo ka saarida macluumaadkii afarta qoraal.

Gudidu waxay sidoo kale ku talinayaan in Meta:

- Isku keento shuruucda iyo tilmaamaha dhaqan gelinta ee ka hadlaya bogga si loo helo xog dhamaystiran oo si fudud loo heli karo oo ku jira Xarunta Daahfurnaanta.
- Mamnuucdo naqdiyayaasha aadanaha kuwaas oo sameeya go'aamada dhaqan gelinta oo mar kale dib u eego racfaanka go'aankaas.
- Cusboonaysiiso nidaamka qiimeynta GSR si loo dedejiyo naqdinta mudnaanta leh ee bogaga la xidhay.
- Sameyso shuruudo iyo nidaam cusub oo ku daraya boggaga ama akoonada ka shaqeeya saxaafada ee deegaanada xoriyatul qawlka la cabudhiyo iyadoo la raacayo ilo awood leh sida jaantuska tusmada ciqaab la'aanta ee Guddiga Ilaalinta Saxafiyiinta

*Soo koobidda kiisku waxa uu bixinayaa guud marka kiisaska mana bixiyo qiimeyn sharciyad laga duulo.

## Go'aanka Kiiska ee Dhamaystiran

1. **Shaxa Kiiska iyo Aasaaskiisa**

Bishii Janaayo 2025, afar qoraal oo Soomaali ah ayaa lagu daabacay bog Facebook ah, kuwaas oo ka hadlayay dhacdooyin bulsho iyo siyaasad oo dhawaan ka dhacay Jamhuuriyadda iskeed isu magacawday ee Somaliland. Bogga Facebook waxa uu isku qeexaa wariye madax banaan oo waxaa ku xidhan 90,000 oo taageero. Boggaga Facebook waxaa maamula isticmaalayaasha xisaabaadkooda oo waxaa la socda xogtooda shakhsi ahaaneed. Boggagu waxay u ogolaadaan dadka iyo ganacsatada inay ka samaystaan akoon ay ugu xidhmaan dadka ay la hadlayaan.

Laba ka mid ah qoraalladaas waxay ku saabsan yihiin kulammadii iyo hawlihii siyaasadda dhawaan dibadda ee Madaxweynaha Somaliland Abdirahman Mohamed Abdillahi. Qoraalladu waxay wateen sawirro muujinaya safar dibadeed oo uu qaaday Madaxweyne Abdillahi, iyadoo qoraallada hoos ku lifaaqan ee Soomaaliga ahi ay sheegayaan in maamulka Somaliland uu mamnuucay warbaahinta inay tabiyaan wax ku saabsan safarkaasi. Laba qoraalo kale ayaa la xiriira munaasabad rasmi ah oo dadweyne oo ka dhacday Somaliland iyo shir siyaasadeed, kuwaas oo ay la socdeen qoraallo faahfaahsan oo sharaxaya dhacdooyinka.

Laba isticmaale ayaa ku soo warramey bogga hoos yimaada Ururada iyo Shakhsiyaadka Khatarta ah iyo Siyaasadaha Dhaqanka Nacaybka leh, waxaana loo saaray dib u eegis. Qofka dib u eegista sameeya ayaa ogaaday in bogga uu jabiyay Akhlaaqda Nacaybka siyaasaddeeda udagsan oo waxa ay ahayd "in aan la daabicin" (oo ka dhigan in bogga la saaray, talaabooyin lagu xidhayo akoonka). Afarta boosti midna lagama war bixin, laakiin isla naqdiyaha bila aaadanka ah ayaa mid kasta uga saaray inay ku xad gudbeen siyaasada Hadalka Naceybka . Cida samaysay akoonka xogtu ee maamulaysa boggu ma aysan helin wax digniin ah

Xog abuuraha waxay ka qaadatay rafcaan go'aanka Meta ee xidhitaanka bogga iyo afar xog oo kale oo lasoo dhigay go'aanka lagaga saaray. Rafcaankooda looga soo horjeedo afarta xog ee go'aamada afarta xog ay naqdiyeen lix ruux oo naqdiyayaal ah, waxay

keentay in go'aanka hore lagu socdo. Racfaanka looga soo horjeedo go'aanka ah in aan la daabicin bogga looma siinin mudnaanta naqdinta bila aadanka, bogga wuxuu sii ahaaday mid aan la daabicin.

Ka dib markii ay Guddiga doorteen kiisaskan, shirkaddu waxay dib u eegtay go'aankeedii hore ee ahaa in aan la daabicin boggan isla markaana ka qaaday digniintii ee lagu saaray akoonka abuuraha nuxurka.

Sidoo kale afarta qoraal ee lagu soo xushay kiiskan, Gudidu waxay ogaatay 10 kale oo rafcaan oo Somaliland ka yimid oo lagaga doodayo ka saaritaanka xogta ee Meta markii danbe ay ogaatay inuu yahay khalad oo dib ay usoo celisay.

Gudidu waxay sheegeen xogta soo socota marka uu gaarayo go'aankiisa:

Jamhuuriyada iskeeda madax banaanida ugu dhawaaqday ee Somaliland, inkasta oo loo arko inay Jamhuurida Federalka Somalia deegaan kamid ah tahay, waxay ku dhawaaqday madaxbanaanideeda ay kaga go'day Somalia 1991. Inkasta oo dadaalo badan ay jireen, Somaliland ma ay helin aqoonsiga caalamiga ah. Colaado deegaanka iyo gobolka ah, oo ay ku jiraan muran xuduudaha, oo aan la xalin iyo isku dhacyo qabiilada iyo hanjabaado amni oo ka imanaya kooxo argagixiso ah sida Al-Shabaab, ayaa joogto ah.

Inkasta oo ay leedahay xasilooni Somaliland, xoriyada saxaafada ayaa walaac badan ka jiraa, sida Somalia oo dhan ka jirta. Gudida Ilaalinta Saxaafada (Committee to Protect Journalists, CPJ) ayaa Somalia darajada sadexaad ee Jaantuska Ciqaabka Caalamiga ah ee 2024 ku dartay (darjo sanadle oo ciqaabta ah dilka wariyayaasha marka loo eego tirada guud ee wariyayaasha), iyo daraja kowaad laga bilaabo 2015 ilaa 2022, oo waxa uu uga yeeshaa dalka kowaad ee "ugu daran ee jaantuska" (CPI kamay saarin Somaliland). Siday ay sheegtey hay'ada xoriyada saxaafadu Reporters without Borders (RSF), wariyayaasha ka shaqeeya Somalia, oo ay ku jirto Somaliland, waxay khatar ugu jiraan in la xidho, la qabto oo xitaa la dilo. Ilaa 2010 wax ka badan 50 wariye ayaa lagu dilay, taas oo ka dhigtay Somalia mid kamid ah dalalka khatarka ugu badan ku jiraan wariyayaasha caalamka. RSF waxay sheegtey in maamulka Somaliland ay gaar ahaan cabudhiyeen oo ay cadaadis saaraan saxaafada deegaanka. Sidoo kale, Freedom House waxay sheegeen in wariyayaasha iyo dadka kale ee caamka ah ay cadaadis kala

kulmaan maamulka Somaliland oo, inkasta oo ay jiraan saxaafado waraysyo, TV iyo onlayn, badankood xidhiidh siyaasadeed ay leeyihiin.

Ka warbixinta musuqa dawlada, siyaasada arrimaha dibaha iyo xaalada siyaasadeed ee deegaanka ayaa aad u ah mid xasaasi ah waxaana si joogto ah uga dhasha aargoosi. Marka ay ahayd 2022, kadib markii la dhaliilay wada hadalkii caalamiga ah ee Madaxweynihii Somaliland ee Wakhtigaa ee Muse Bihi Abdi, hay'adaha sirdoonka ayaa u gacan qaaday sadex wariyayaal, iyo wariyayaal kale oo deegaanka oo dad badan ay ku xidhan yihiin Facebook ayaa la xidhay. 2023, 14 wariyayaal ayaa la xidhay oo ka waramayay mudaharaadka mucaaradka. Badanaa, in xidhiidh lala yeesho kooxaha mucaaradka ayaa badanaa keenta xadhig. Janaayo 2024, xadhiga iyo ciqaabta la sheegey ee loo geystay shaqaalaha MM Somali TV ayaa sidoo kale muujinaysa caadaysiga tacadiga ee ku yimaada baahinta muhiimka ah ee arrimaha dawladu ayna jeclaysan. Saamaynta cabudhinta lagula kaco dadka buriya hadalka rasmiga ah ee dawlada waxaa loogu jawaaba argigixiso iyagoo halis gelinaya ammaanka jireed ee suxufiyiinta (ka eeg faalooyinka Somali Journalists Syndicate, PC-31295). aaladdan awgeed, wariyayaasha jooga Somaliland ayaa sameeyay weedha “lagu xukumay danbi” oo loola jeedo nidaamka ciqaabta xirfadlayaasha saxaafada, siday u noqotay joogtada ah.

Marka laga soo tago gacan qaadka iyo xadhiga aan sharciga ahyn, xannibaadda hay’adaha dawliga ah ayaa si wayn u wiiqa madax banaanida wariyayaasha. Dawlada Somaliland waxay mamnuucday BBC 2022 taas oo muujinaysa diidmada barista saxaafada caalamiga ah iyo xadidaad helitaanka macluumaadka ee dadka Somaliland. Sidoo kale, Diseember 2023 waxay mamnuucday Universal TV doodihiisa – iyada oo looga duulayo "anshax xumo" iyo qiyamka dhaqanka iyo Islaamka - taas oo muujinaysa qaab koraya oo xakamaynta siyaasadeed ah oo dhaqanka iyo diinta lagu ilaalinayo, taas oo keeneysa majaro habaabin shacabka ah.

Deegaankan cakiran ee saxaafada soo jireenka ah, madalaha dhijitaalka ah ayay ka dhigeen meelo daruuri u ah baahinta wararka, dhaleecaynta iyo ilaalinta madaxbanaanida saxaafada. Baraha bulshada ayaa ah meelo muhiim u ah

wariyayaasha iyo dadka kale ee ka faalooda xannibaadaha dawlada ay soo rugto oo isku xidha dhamaan daabadayaasha deegaanka iyo kuwa caalamiga ahba. Facebook waxa uu kaalin wayn ka ciyaaraa wadaagista wararka iyo macluumaadka, siday ay sheegku qeexeen Somali Journalists Syndicate "madasha ugu wayn ee wariyayaasha iyo bulshada deegaanka" ee Somaliland iyo Somalia, taas oo u sahashay wariyayaasha inay ka gudbaan tafatirka dawlada oo ay si toos ah ugu xidhmaan dadka ku xidhan (eeg PC-31295). Xogta Julaay 2025 waxay muujinaysaa lix kamid ah 10 kii booqasho ee baraha bulshada ee Somalia, oo ay ku jirto Somaliland in lagu booqday Facebook.

## 2. Gudbinta Isticmaalaha

Isticmaalayaasha rafcaanka u gudbiyay Guddiga ee go'aanka Meta waxay sheegeen in ujeedada wadaagista afarta macluumaadka dhamaantooda ay ahayd wadaagis macluumaad, ujeedadoodu aysan ahayn weerar ama takoorid shakhsi ama koox, iyo inaysan ahayn qoraalada kuwa aan ku xadgudbin siyaasadda Dabeecada Nacaybka.

## 3. Siyaasadaha Xogta Meta iyo Gudbinada

*I. Siyaasada Xogta Meta*

Dabeecadaha Nacaybka

Meta waxay ku sheegtey "habdhqanka nacaybka" inuu yahay "weerar tooska ah oo dad lagu qaado" iyadoo lagu salaynayo sifooyin la ilaaliyo, balse shirkaddu hadda way qirtay in siyaasaddan aan lagu dabaqin kiisaskan.

Boggaga

Boggaga waxay ka gaar yihiin xogta dadka iyo kooxaha oo waxaa loogu talo geley inay bixiyeen jiritaan gaar ah oo Facebook iyo isku xidh daabadeyaal balaadhan. Waxay sidoo kale yihiin akoono shakhsi ahaaneed oo gaar ah, oo la xidhiidha shakhsi, oo inta bog la sameeyay oo lagu maamulay akoon shakhsi ahaaneed laakiin leh macluumaad gaar ah oo wata agabyada xirfadlaha ee lacagta lagu helo oo wax xayaysiiya.

Xarunta Bayaaminta Meta waxay sheegeysaa in boggaga ay maamulaan wakiilo loo ogol yahay oo ay u hogaansamaan Heerarka Bulshada Balaadhan ee Meta, oo waxaa kmai dah xadidaado xogta iyo isticmaalka khaldan ee la mamnuucay. Boggaga waxa saari karaa hadii magacooda, sharaxa, sharaxa sawirka ama macluumaadka ay xad gudub ku yihiin Heerarka Bulshada. Maamulka bogga kama masuul aha oo kaliya waxay iyagu soo dhigaan bogga, laakiin sidoo kale ansixinta xogta xag gudubka ah ee dadka kale ee bogga. Boggaga sida joogtada ah ugu xad gudba siyaasadaha waxaa laga saari karaa talooyinka, oo waxay baahiyaan waa la yarayn karaa, oo waxay waayi karaan nidaamka lacagta lagu sameeyo ama waa laga saari karaa.

Xarunta Kaalmada Facebook ayaa sharaxaysa boggaga in laga saari karo hadii ay soo dhigaan "waxyaabo isbaam ah [ama] xog dadka majaro habaabinaysa," oo kasoo horjeeda Shuruucda Adeega Meta ama xad gudub ku ah Siyaasadeeda Nacaybka or Siyaasadaha Xayaysiiska. Hadii bogga la ogaado inuu si "khiyaano ah" like u uruursanayo, Meta waxay kusoo rogi kartaa xadidaado, sida in laga bakhtiiyo badhanka like-ta. Isla qoraalada qaybta Xarunta Kaalmada ayay isticmaalayaashu ku gudbin karaan rafcaanka go'aanka ee ka saaritaanka bogga ama xadidaada bogga ee nidaamka ka saaritaanka ee laga heli karo bogga.

*II. Gudbinaha Meta*

Meta waxay ka saartay bogga oo waxay masaxday afar macluumaad laso dhigay iyada oo uga duulaysa siyaasada Habdhaqanka Nacaybka.

Kadib marka ay Gudidu dooratay kiisaska, shirkadu waxay bedeshay go'aamadeedii hore taas oo sheegtey inay ahaayeen khaladaad bila aadanka, oo waxay soo celisay dhamaan xogtii, iyo bogii oo waxay ka qaaday xayiraadii akoonka isticmaalaha. Meta waxay qiratay in wax ka mid ah qoraallada aanu ku jirin weerar lagu qaaday shakhsiyaad iyadoo lagu salaynayo sifooyin la ilaaliyo, isla markaana aysan ahayn in la tirtiro. Iyada oo la tixgelinayo codsiga Gudidu, Meta waxay baadhitaan ku samaysayn sababta ay tani u dhacday. Shirkadu ma aysan awoodin inay siiso Gudida macluumaad

dheeraad ah oo ku saabsan sababta go'aanka hore. Naqdintii sideedaad ee rafcaanka, Meta waxay ogaatay in khaladaadkaas ay keeneen naqdiyayaasha bila aadanku ah "oo ayna u fiirsan maadaama ay daalaan" iyo cilado farsamo oo sababay in nidaamku si toos ah u fuliyo hawlaha markii kormeerayaashu ka tageen shaqada dib-u-eegista iyada oo furan. Shirkadu waxay sheegtey in ilaa markii ay samaysay madalaha tobobarka iyo qorshaynta ee dhaqan gelinta tobobarka dheeraadka ah ee lagu hormarinayo diirad saaritaanka iyo cusboonaysiinta siyaasada ee dhamaystiran iyo "maamulida eexda."

*Naqdinta Bogga*

Naqdinta bogga waxaa la bilaabi karaa kadib marka ay soo gudbiyaan cabasho isticmaaleyaal, la-hawlgalayaal dibadeed oo leh jaanaalo gaar ah oo lagu soo gudbiyo xad gudubyada iman kara, ama la socodka tooska ah. Tafatirayaasha bila aadanka ah ayaa eegaya xogta lasoo dhigay bogga oo waxaa barbar socda shayada waawayn ee bogga laftiisa, (sida, xogta bogga, cinwaanka, sharaxaada, waxa lagaga hadlo ama sawirka bogga).

Meta waxay isticmaashaa shuruudo qarsoodi, oo gaar ah oo lagu dabaqo xadidaadaha boggaga oo uma shaaciso shacabka. Ka saaritaano xog oo badan mudo yar oo gaaban waxay guud ahaan keentaa hal digniin oo lagu dhufta bogga ah.

Bogga sidoo kale waa la saari karaa marka ay si ula kac ah ama shayo kale oo bogga ah ay ku xad gudbaan Shuruucda Bulshada. Kuwaan waxaa kamid ah xad gudubyada magaca, sharaxa ama sawirka yaala, ama marka maamulayaasha bogga ay sameeyaan xog, sida xog lasoo dhigo, faalooyin ama qolal xad gudub ku ah Shuruucda Bulshada. Go'aanka in laga saaro bogga waxaa gaari kara hal naqdiye oo kaliya.

Kiiskan, maadaama Meta ay isla mar ahaantaas tallaabo ka qaadday afarta qoraal, arrintan waxay keeni lahayd hal digniin ku dhaca oo lagaga soo horjeeda bogga. Inaan bogga la daabicin ayaa markaa u baahan shey ku xad gudbaaya bogga. Kadib markii dib loo qiimeeyay go'aanka hore, Meta waxay sheegtey in aanu jirin waxba.

*Rafcaanada*

Isticmaalayaasha waxay racfaan ka qaadan karaan inaan la daabicin bogga si gaar ah iyagoo rafcaanka uga qaadanaya xogta lasoo dhigay bogga, inkasta oo rafacaanadani ay leeyihiin dhabo lasoo mariyo oo ka duwan dhabooyinka lagu saleeyo suuqa. Labada dhaboba, rafcaanadu waxaa mudnaanta lagu siiyaa iyada oo lagu saleynayo shuruudo isku mid ah, sida inta ay le'eg tahay dadka ay gaadhay, inta ay le'eg tahay xaalado iyo siday u badan tahay in xad gudub yimaado.

Naqdiyayaasha bila aadanka ayaa ka qayb geli kara dhawr naqdin shaqo oo la xidhiidha isla naqdinta shaqada, labadaba bilawga iyo naqdinta iyo rafcaanka. Markan oo kale, naqdiyaha suuqeed ee Somaliga ah ee tiray qoraallada isla markaana tirtiray bogga ayaa sidoo kale loo xilsaaray inuu dib u eego racfaan laga gudbiyay mid ka mid ah go’aamadiisii tirtirka nuxurka. Rafcaanada afarta go'aan ee xogta ayaa mid kasta la naqdiyay laba jeer, oo waxaa eegey lix tafatirayaal bila aadan ah, oo waxaa kamid ah tafatiraha hore. Isticmaalaha sidoo kale waxa uu rafcaan ka qaatay go'aanka inaan la daabicin bogga laakiin marna ma helin mudnaanta naqdinta.

*Nidaamyada Kahortaga Khaladaadka*

*Eegitaanka*

Nidaamka egitaanka Meta waxa uu qayb ka yahay xeeladooda kahortaga khaladaadkooda oo loogu talo geley in laga helo lakab dheeraad ah oo lagu naqdinayo xad gudubka xogta, oo waxaa kamid ah boggaga khaladaadka ee sida gaar ah u baal maray saamaynta cida gacan saarka la leh Meta. Eeigtaanka waxa uu ka kooban yahay laba qaybood: Naqdinta Labaad ee Guud (General Secondary Review, GSR), waxaa laga qaadan karaa rafcaan taas oo ku salaysan mudnaanta tooska ah ee xogta, iyo Naqdinta Labaad ee Hay'ada ee Xasaasiga ah (Sensitive Entity Secondary Review, SSR), oo khuseeya naqdinta boostiyada ee hay'adaha in Meta ay ku darto liisaskeeda gudaha. Xogta waxaa mudnaanta loo siiyaa naqdinta ku salaysan xaaladaha khatarta sida dhaqan gelinta, mawduuca iyo xasaasiyada hay'ada iyo darnaanta xad gudubka daran ama talaabooyinka dhaqan gelinta.

Boggaga waxaa lagu dari karaa SSR taas oo ku salaysan shuruudaha sida: a) noca isticmaalaha ama hay'ada waxaa kamid ah hay'adaha madaniga ah iyo dawliga ah (sida, saraakiisha la doortay iyo hay'ada xuquuqda bila aadanka), "hay'ada saxaafadeed, ganacsiyada, bulshooyinka iyo curiyayaasha, oo waxaa kamid ah xayaysiiska," b) hay'adaha hore u sheega dhaqan gelinta badan, c) dhacdooyinka caalamiga ah ee waawayn iyo d) shuruudaha sharci iyo qawaaniineed (eeg Fikirka latalinta siyaasada ee barnaamika eegitaanka Meta).

Hay'adaha, oo ay ku jiraan suxufiyiinta, badanaa waxaa lagu daraa liisaska SSR marka lagu sameeyo ciqaab xad-dhaaf ah ama ay Meta ku soo jeedaan indhaha sababo la xiriira ka qaybgalka dhacdooyin waaweyn oo caalami ah, sida warbixinta ku saabsan dhibaatooyin iyo colaado. Tirinta istimcaalaha ayaa ah shuruudaha Meta isticmaasho ee lagu eego marka lagu daro boggaga ay ku jiraan SSR. Bogga kiiskan qayb kama aha barnaamijka SSR ee wakhtiga soo dhigtaanka. Meta waxay diidday inay Guddida siiso dulmar ku saabsan hay'adaha warbaahinta Bariga Afrika iyo suxufiyiinta ku jira liiska SSR, iyadoo ku sababeysay caqabado hawlgal iyo welwel ah in xogtaas si khaldan loo fasiran karo.

Go'aamada lagu masaxayo xogta lagu soo baahiyo boggaga iyo go'aamada in aan la daabicin boggaga ama la demiyo wajahad waxaa loo sameeyaa waxaa loogu talogalay in la eego, oo ay ku jiraan GSR. Kiisaskan, Meta waxay ku talinaysaa in nidaamkeena darajadu ay go'aamiyeen bogga iyo afarta xog ee keeney naqdinta bilaa aadanka ee hore, balse Meta ma awoodin inay bixiso faahfaahin ku saabsan sababta heerar dib-u-eegis oo saree e loogu sameeyo bogga (tusaale, naqdin dheeraad ah ama kor u qaadis) aanay ku dhicin nidaamka GSR.

*Nidaamyada Kahortaga Khaladaadka ee kale*

Naqdinta Dabacsan ee Dhawrka ah (DMR) waxaa weeye nidaamka kahortaga khaladka oo u ogolaada shirkada inay ku celiso kiisaska la naqdiyay si loo naqdiyo si ay u helaan go'aano joogto ah oo kakala imaanaya naqdiyayaal kala duwan kahor inta aan talaabada dhaqan gelinta ah la qaadin. DMR looma ogolaanin naqdinta hore laakiin waxaa looga furay safka rafcaanka ee go'aanada xogta oo kaliya, taas oo keentay rafcaanka afar shay oo lagu heley naqdin dheeraad ah. Looma furin naqdinta bogga. DMR waxaa loo furay iyada oo lagu saleynayo shuruudaha sida xad gudubka daran iyo awooda naqdinta bila aadanka. Laakiin, kiiskan oo kale ma cada hadii dhamaan shaqada naqdinta la dhamaystiray, ama hadii si toos ah talaabadu ay u keentay mushkilad agab. Tani waxay keentay in go'aamada xogta ee hore la qaatay, iyada oo ay qolo seddexaad ay naqdin ku samaynin.

Naqdimahan ma buuxin shuruudaha shirkada ee ka shaqaysiinta wixii nidaamyada kahortaga khaladaadka ee kale.

*Barnaamijka Diiwaan Gelinta Wariyaha*

Barnaamijka Diiwaan Gelinta Wariyaha ee Meta waxa uu siiyaa badbaado amaan oo dheeraad ah wariyayaasha ku jira, sida ka ilaalin dheeraad ah oo handdaada, iska dhigitaanka iyaga, jabsashada iyo handadaadaha kale. Si toos ah uma damaanad qaadayo gelinta SSR, laakiin Meta waxay eegi kartaa calamaada in uu ruuxu yahay wariye. Kaliya wariyayaasha kamid ah hay'ad warbaahin oo ku Diiwaan gashada "Bog cusub" ayaa ku biiri kara Nidaamka Diiwaan Gelinta Wariyaha oo waa inay soo gudbiyaan shan maqaal, linkiga xogta hagaha shaqaalaha, cinwaanka iimeelka hay'adaha wararka ee xirfadlaha ah. Ku biiritaanka waxaa heli kara tiro yar oo dad ah deegaanada, laakiin Somalia ama Somaliland toona ma heli karaan. Meta ma aysan awoodin inay bixiso shuruudaha u qalanka dalka ee barnaamijkan.

Gudidu waxay waydiisay Meta 26 su'aalood oo ka hadlaya nidaamka naqdinta iyo rafcaanka ee boggaga, kahortaga khaladaadka, eegitaanka iyo nidaamyada tooska ah

ee loo isticmaalo tafatirka boggaga, iyo sidoo kale khayraadka tafatirka iyo awooda Somalia, oo ay ku jiraan Somaliland. Su'aalahan sidoo kale waxay ka hadleen taageerada Meta iyo barnaamijyada ilaalinta ee saxaafada iyo wariyayaasha. Meta waxay si buuxda uga jawaabtay 23 su'aalood oo sadexna qayb ahaan ayay uga jawaabtay.

## 4. Faalada Shacabka

Gudida Kormeerku waxay heleen laba faalo oo shacab oo buuxiyay shuruudaha gudbinta. Hal faalo waxaa laga soo gudbiyay Afrikada Saxaraha Ka Hoosaysa mid kalena Aasiyaanka Baasifiga iyo Ooshiyaana. Si aad u akhrido faalooyinka lagu soo gudbiyay adigoo haysta ogolaanshaha shacabka in la daabaco, guji halkan.

Gudbintu waxay ka hadlaysaa mawduucyada so socda: dhaqamada ugu wanaagsan ee tafatirka xogta iyo boggaga danaha shacabka; deegaanka saxaafada iyo caqabadaha saxaafada madaxa banaan ee Somaliland; kaalinta baraha bulshada ee lagu taageerayo warbixinta madaxa banaan ee deegaanka; iyo saamaynta khaladaadka tafatirka xogta ee Facebook uu ku leeyahay majaro habaabinta iyo wariyenimada muhiimka ah.

## 5. Kormeerka Qiimaynta Gudida

Gudidu waxay naqdisay go'aanka Meta ee kiiska oo waxay eegtay siyaasadaha xogta ee Meta, qiimaha iyo xuquuqda jawaabaha bila aadanka, iyo sidoo kale saamaynta qaabka balaadhan ee Meta ay ku maamuleyso xogta. Gaar ahaan, Gudidu waxay baareen muhiimiada saxnaanta bogga ee dhaqan gelinta wariyaha ee danaha shacabka ee deegaanada halka ay ka jirto xoriyada saxaafada oo weerar lagu yahay, iyada oo laga duulayo bayaanka Meta ee Janaayo 2, 2025 ee "Hadal badan, khaladaad yar” https://about.fb.com/news/2025/01/meta-more-speech-fewer-mistakes/.

## 5.1. U Hogaansanka Siyaasada Xogta Meta

*Shuruucda Xogta*

Gudidu waxay ogaatay in afarta qoraal aanu xad gudub ku ahayn siyaasada macluumaadka Meta, oo waxaa kamid ah shuruucdeeda Habdhaqanka Nacaybka, oo may ahayn in laga saaro. Xitaa hadii uu yimaado xad gudub, waxay ahayd in midaan ay keento hal digniin oo kaliya, taas oo aan ahayn wax looga duuli karo in bogga aan la daabicin. Siday qirtay Meta iminka, boggu malaha wax xad gudub ah. Iyada oo aanay jirin digniin hore oo bogga ah, in ciqaab lagu soo rido maysan ahayn, oo in markaa laga saaro boggu waxay ahayd jawaab daran oo gabi ahaanba aan lahayn cudurdaar.

Meta waxay ilaalin kari wayday saxaafada danaha shacabka ee kiiskan laga hadlayo. Madalaha baraha bulshada, gaar ahaan Facebook, ayaa ah agab daruuri u ah saxaafada madaxa banaan ee Somaliland. Maadaama oo bogga uu maamulo wariye madax banaan oo dad badan oo ilaa 90,000 ay ku xidhan yihiin, ku baahinta arrimaha siyaasada iyo bulshada ee xasaasiga ah, waxay saameeyaan guul daraysiga ilaalinta tayada, kahortaga khaladaadka iyo helitaanka racfaanka waa xaalad aad u daran. Waxay sii xoojiyaan jawi hadalka lagu caburiyo oo lagu garto cadaadis iyo xannibaad dowladeed, iyadoo xaaladdu tahay mid ay halis weyn ku yihiin soo sheegisaha khaldan ee ka imanaya shaqsiyaad ama hay’ado xiriir la leh dawladda (eeg sidoo kale faallada dadweynaha ee uu bixiyay Wargeyska Sharciga iyo Tignoolajiyadda), PC-31314).

## 5.2. U Hogaansanka Masuuliyadaha Xuquuqda Aadanaha ee Meta

Gudidu waxay ogaadaan in ka saarida xogta macmiilka iyo bogga ayna waafaqsanayn masuuliyadaha xuquuqda bilaa aadanka Meta.

1. ***Xorriyadda Hadalka (Maqaalka 19 ICCPR)***

Nidaamka tafatirka xogta Meta waxay saamayn xun ku yeelan karaan xuquuqda xoriyatul qawlka. Xeerka 19 ee Shirka Caalamiga ah ee Xuquqda Madaniga ah iyo Siyaasadaha (International Covenant on Civil and Political Rights, ICCPR) waxa uu siiyaa badbaado balaadhan xuquuqdan, taas oo muhiim u ah bixinta siyaasada ee (Faalada Guud ee Lambar. 34, firqada. 11 iyo 38). Gudida Xuquuqda Aadanaha Qaramada Midoobay (UN) waxa uu xooga saaraa "xoriyada, tafatir la'aanta iyo cabudhin la'aanta saxaafada ... inay daruuri tahay" iyo "oo ay dhigayso mid kamid ah tiirarka dimuqraadiyada ee bulshada" (Faalo Guud Lambarka. 34, xirfada. 13).

Marka dowlad ay soo rogtay xayiraado ku saabsan hadalka, waa in ay buuxiyaan shuruudaha sharcinimada, ujeeddo sharci ah, iyo baahi iyo isu dheellitirnaan (Qodobka 19, faqraddiisa 3aad, Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda (Maqaalka 19, firqada 3, ICCPR). Shuruudahan waxaa badanaa loola jeedaa "tijaabinta seddexda meel ah." Gudidu waxay isticmaashaa nidaamkan si u turjunto dadaalka xuquuqda madaniga ah ee ikhtiyaariga ah ee Meta, taas oo la xidhiidha go'aanada xogta ee shakhsi ahaaneed ee la naqdinayo iyo qaabka balaadhan ee Meta ee xogta lagu maamulo. Sida uu sheegay Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee u qaabilsan xorriyadda ra'yiga iyo hadalka inkastoo "shirkaduhu aanay lahayn waajibaadka dawladaha, haddana saamayntoodu waa mid ku qasbeysa inay qiimeeyaan isla su'aalaha la xiriira ilaalinta xuquuqda isticmaaleyaashooda ee xorriyadda hadalka" (A/74/486, firqada. 41).

*I. Sharciga*

Xeerka sharciga ah wuxuu u baahan yahay shuruuco xadidaada hadalka inuu noqdo mid la heli karo iyo fasiix ah, saamaynta hel bartilmaameedka ku filan ee loogu suurto gelinayo shakhsiga inuu u maamulo habdhaqankiisa si waafaqsan (Faalada Guud ee Lambar. 34, firqada. 25). Intaa waxaa dheer, xeerarkan "looma oggola in ay siiyaan awood aan xad lahayn dadka loo xil saaray fulintooda si ay u xaddidaan xorriyadda hadalka," waana in ay "bixiyaan hagid ku filan dadkaas si ay u fahmaan noocyada hadalka ee si sharci ah loo xaddidi karo iyo kuwa aan la xaddidi karin" (ibid). Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee u qaabilsan xoriyatul qawlka waxay sheegeen in

marka lagu dabaqo maamulka cida gaar ah ee hadalka onleynka ah, shuruucda inay noqdaan wax cad oo gaar ah (A/HRC/38/35, firqada. 46). Dadka isticmaala madasha Meta waa inay heli karaan oo ay fahmi karaan shuruucda iyo naqdiyayaasha xogta waa inay leeyihiin tilmaamo cad oo ku saabsan dhaqan gelintooda.

Meta malaha hal ilo oo dhexe, oo lagu sheegey siyaasadaha xogteeda lagu maamulo boggaga, taas oo keentay mushkilad bayaamin iyo cadayn ah. Macluumaadka ku saabsan qaabka Meta ee bogga maamulka oo ku firidhsan lix goobood oo kala duwan, waxaa kamid ah Xarunta Bayaaminta, Xarunta Kaalmada iyo Xarunta Ganacsiga. Khayraadka siyaasada ee Xarunta Ganacsiga Meta waxay u baahan tahay gelitaan akoonka Facebook si loo galo. Tusaalayaasha waxaa kamid ah:

- *Boggaga Facebook – macluumaadka guud ee boggaga. Si aad u hesho khayraadka Meta ee isticmaalayaasha geleya xisaabta Facebook.*
- *Siyaasadaha Boggaga, Bulshooyinka iyo Dhacdooyinka ee Facebook iyo shuruudaha Boggaga Facebook – ee sida boggaga ay tahay in loo sameeyo, maamulo ee loo tafatiro.*
- *Ka saaritaanka Boggaga iyo kooxaha iyo Xadidaadaha akoonada – ee siyaasada xad gudubka, xadidaadaha iyo digniinta ee nidaamka la xidhidha boggaga.*
- *Sababta Boggaga Facebook loo xidho ama loo xadido iyaga – ee xadidaadaha iyo xidhitaanka bogga.*

Khayraadkan ma waafaqsana heerka faahfaahinta ee la bixiyay, markiiba, la garanaynin ama xitaa kahor imanaya. Tan ayaa adkaynaysa oo dawakhinaysa isticmaalayaasha iyo naqdiyayaasha inay fahmaan shuruucda oo waxay keeneysaa walaacyo sharci oo adag.

Luqadda guud ee Meta ee loo soo bandhigo dadweynaha ayaa bixisa faahfaahino xaddidan oo ku saabsan nidaamka iyo shuruudaha Meta ee talaabo ka qaaditaanka boggaga. Tusaale ahaan, Meta ma bixiso faahfaahin ku saabsan shuruudaha ka saaritaanka bogga, marka laga tago macluumaadka guud ee lagu sharaxay illaha la

xidhiidha. Inkasta oo ay Meta si guud ay dadka ugu sheegto inay ku qaado nidaamka xadidaada ee xogta lasoo dhigayo boggaga, waxay leedahay shuruudo adag oo qarsoodi ah boggaga aan la baahin.

Sidoo kale, iyada oo Xarunta Bayaaminta ay sheegeyso liiska xad gudubka ee shayada muhiimka ah ee bogga, sida "magaca, sharaxa ama sawirka sare," ma sharaxdo qaabka, ma bixiso naqdin gudaha ah, oo loo baahan yahay inuu buuxiyo bogga in aan la baahin.

Meta waa inay xaqiijiso in shuruucdaha dhaqangelinta bogga ayaa u fudud isticmaalayaashu inay galaan oo ay isticmaalaan, caadiyan liskugu geeyay hal il dhexe, oo si cad loo fahmi karo.

*II. Ujeedada saxda ah*

Sharciga xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah sida ay u dabaqaan dalalku, wixii xadidaado ah ee xoriyatul qawlka ah sidoo kale waa in lagu doonayaa ujeedada sax ah oo ku qoran ICCPR, oo ay kamid yihiin ilaalinta xuquuqda dadka kale.

Gudidu waxay hore u qabteen ujeedooyinka siyaasada Habdhaqanka Nacaybka Meta si loo ilaaliyo xuquuqda dadka kale, ujeedo sax ah oo lagu doonayo in lagu aqoonsado xuquuqda aadanaha (eeg, tusaale ahaan, go'aamada Boostiyada Lagu Taageerayo Mudaharaadyada UK, Myanmar Bot).

*III. Daruuri oo Ku Haboon*

Sida uu dhigayo Xeerka ICCPR ee 19(3), daruuriyaadka iyo munaasab ahaanshaha in xadidaada qawlka, " waa in ay ku habboonaadaan ujeeddadooda ilaalineed; waa in ay noqdaan hababka ugu yar ee faragelinta leh ee lagu gaari karo ujeeddadaas ilaalineed; waa in ay noqdaan kuwo isu dheellitiran marka loo eego danaha la doonayo in la

ilaaliyo," (Faalada Guud Lambar 34, firqada. 34). Laakiin, sida uu dhigayo Special Rapporteur, shirkadaha waa inay "muujiyaan daruuriyaadka iyo inta u dhiganta ee wixii talaabooyinka ficilka (sida kas aaritaanka ama xidhitaanka xisaabta)" (A/HRC/38/35, firqada. 28). Shirkadaha waxaa ku waajib ah inay "qiimeeyaan isla su'aalaha ku saabsan ilaalinta xuquuqda isticmaalayaashooda ee xoriyatul qawlka" (A/74/486, firqada. 41).

Gudidu waxay ogaadaan in laga saaro boostiyadaas, iyo in aan la daabicin bogga aysan ku salaysnayn wax xeer ah, sidaas darteedna aysan ahayn kuwo lagama maarmaan ah balse gebi ahaanba ahaayeen kuwo aan caddaalad ahayn oo aan isu dheellitirnayn. Kiisaskan waxay muujinayaan mushkilad qaabaysan oo naqdin tayadeeda liidata ah oo xogta luuqada Somaliga ah oo ay la socoto ku filnaansho la'aan barnaamijyada kahortaga khaladaadka meta iyo nidaamyada racfaanada. Xaqiijinta Meta waxay noqotay inay si khalad ah uga saartay toban boostiyo kale oo racfaan looga qaaday Gudida oo taageeraya gunaanadkan. Tani qaasatan waxay leedahay walaac marka laga hadlayo deegaanka xaddidaada leh ee xoriyada saxaafada iyo xoriyatul qawlka aad u baahsan ee ka jira Somaliland. U isticmaalka daba gal dawlada iyada oo u mareysa shuruuco xaddidaad wata iyo caga juglayn si loo xakameeyo saxaafada oo loo aamusiiyo warbixinta dhaliilada wata ayaa kiciyay isku haleyn xoogan oo la isku haleeyo baraha bulshada, iyo gaar ahaan Facebook, taas oo shirkadu ka faa'ido (eeg faalada shacabka ee ka timid Midowga Saxafiyiinta Soomaaliyeed, PC-31295). Deegaankan, Meta waxay ku leedahay masuuliyad sareysa ay ku ilaalinayso xoriyatul qawlka iyo xaqiijinta helitaanka macluumaadka. Marka loo eego saamaynta daran go'aanada ka saaritaanka bogga ee Meta iyo ka saaritaanka xogta ee wariyayaasha ku nool deegaankan, shirkadu waa inay xaqiijisaa saxnaanta dhaqan gelinta si aysan markaa gacan uga gaysan saamaynta xun ee loo geysto xuquuqda bila aadanka.

*Kahortaga khaladaadka*

Talaabooyinka kahortaga khaladaadku waxay daruuri u yihiin xaqiijinta in hadalka aan loo xaddidin wax aan loo baahnayn. Iyada oo la yareynayo ka saaritaanka khaldan ee xogta iyo boggaga, nidaamyadan waxaa loogu talo galey inay ka caawiso Meta inay sii wadato yoolasha badqabka ee lagu yaraynayo qaabka dhaxgalka, iyada oo la

adeegsanayo habab aan si xad-dhaaf ah u faragelin, si loo xalliyo nuxurka waxyeellada leh iyada oo aan la saarin culays aan loo baahnayn xorriyadda hadalka.

Ku guuldaraysiga Meta in ay ku darto bogga nidaamkeeda eegitaanka SSR ilaa heer mushkilad balaadhan, oo boggaga noocan ah ay u muuqdaan inay buuxiyeen shuruudaha lagu qori lahaa, balse haddana aan si firfircoon loogu darin. Hadii boggan lagu dari lahaa, ka saaritaanka afarta boosti iyo bogga waxaa loo gudbin lahaa naqdin labaad oo gudaha ah, taas oo u ogolaanaysa Meta inay qabato oo ay saxdo khaladaadka xitaa waxaa ayey baadhi lahayd sababta keentey. Tani waxay muujinaysaa baahida aqoonsiga marka hore iyo ku darista dadka nuqul SSR, gaar ahaan wariyayaasha iyo dadka waawayn ee wax ka faalooda ee ka shaqeeya meelaha sida Somaliland oo kale ah. Hay'adahan waxaa macquul ah inayna usoo xaraynaynin faa'ido wayn Meta, balse cawaaqibka kasoo baxa ka saaristooda hababkan ilaalinta ah aad buu u saameeyaa xorriyadda hadalka. Shuruudaha SSR waa in loo waafajiyaa xaqiiqooyinka suuqa. heerarka sida tirada dadka raacsan waa in lagu miisaamo xadigooda tirada isticmaalayaasha suuqa. Dadka madaniga ah ee sida joogtada ah u wada hadalada ka hadlaya danaha shacabka, gaar ahaan meelaha ay cabburintu ama xayiraadda xogtu ka jirto sida Somaliland, waa in mudnaanta la siiyaa.

Eegida GSR sidoo kale wuxuu u muuqdaa inuu iska indha tiraayo nuxurka danaha shacabka ee muhiimka ah ee ka imaada saxaafada madaxa banaan iyo warbixiyayaasha madaxa banaan oo ku guuldareystay inuu buuxiyo xaddidaadaha la xiriira diiwaangelinta SSR ee xaaladdan. Sida loo qorsheeyay, GSR waxay ahayd inay la socota xogta ay soo dhigayaan iyo boggaga si naqdin dheeraad ah loogu sameeyo, laakiin taas ma dhicin, taasoo muujinaysa in nidaamku uusan siinayn miisaan ku filan shuruudaha ugu khuseeya ogaanshaha ee xaaladdan. Gudidu waxay hore usoo bandhigtay walaacyo in xitaa marka laga shaqaysiiyo, u qalanka xogta GSR ayna gaadhin badanaa khabiirada mawduuca ee Meta oo markaa ay ka dhiman tahay naqdinta qiimaynta xogta ee lagu daqabi karo (eeg Fikirka Latalinta Siyaasada ee barnaamijka eegitaanka Meta). Marka la eego xaalada deegaanka ee ka warbixinta

danaha shacabka, gaarista ruuxa hadlayaa marka lala barbardhigo cabirka suuqa, iyo jawiga guud ee xorriyadda rayidka iyo warbaahinta ee Somaliland waxay ahayd inay u horseedo in nuxurka lagu siiyo mudnaanta dib-u-eegis dheeraad oo gudaha ah iyadoo loo marayo GSR.

Nidaamyada kahortaga khaladka dheeraadka ah ee Meta sida DMR midkood ma aysan ahayn kuwo shaqeeya ka hortagga khaladaadka kiiskan ama lamaba isticmaalin gebi ahaanba. Iyada oo DMR loo furay racfaanada xogta, waxay ku guuldareysatay inay saxdo dhaqan gelinta wayday wax badan inay dhaqan geliyo go'aamada maadaama oo mushkilado ka yimaadeen saxnaanta naqdiyaha iyo mushkilado agabka ah. DMR loogaama shaqaysiinin go'aanka boggaga laga saaray, ama go'aanada xogta hore. Go'aamadan looma dirin naqdino dheeraad ah sida ay dhigayaan nidaamyada kahortaga khaladaadka ee kale maadaama oo ayna buuxin qorshaha u degsan Meta ee ka shaqaysiinta. Nidaamyadan waxaa loogu talo geley in looga hortago khaladaadka dhaqan gelinta ee saamaynta wayn ah ama xaaladaha xasaasiga ah, gaar ahaan marka cawaaqibta suurtagalka ah ee fulintu ay halis badan yihiin, waxaana guddigu sheegtay in kiisaskani waxay ahayd inay buuxiyaan heerkaas.

Barnaamijka Diiwaangelinta wariyaha waxaa weeye qaab wax lagaga qaban karay markan oo kale, maadaama uu saameyn ku yeelan karo in saxafi ama nuxurkiisu lagu daro nidaamka eegitaanka inkasta oo aanu si toos ah dammaanad u siinayn. Waxaa walaac leh in Meta ayna bixin karin macluumaadka shuruudaha u qalanka dalka ee barnaamijkan, oo in Somalia (oo ay Somaliland kamid tahay) ayna u qalmin, markaa laga tago khatarta wayn ee wariyayaashu ay dalkan kula kulmaan. Sidoo kale, shuruudaha ku biiritaanka rasmiga ah waxay ka saareysaa wariyayaasha madax banaan dheefaha barnaamijkan.

Liiskan khaladaadku waxa uu muujinayaa guuldarro ku timid nidaamyada looga hortago khaladaadka, taasoo si toos ah u saameyneysa codadka ugu baahida badan ee ilaalinada. Dadka ka hawlgala saxaafada deegaanada la isku cabudhio halkaas oo

daabadayaasha ay isku haleeyaan Facebook si ay u helaan warbixinno madax banaan. Waxay kaliya timid in Gudida ay la wareegto kiisaskan oo Meta ay qaadayso talaabo ay ku xalinayso mushkiladahaan. Kiisaskan waa inay ku hagaan Meta sidii ay u hormarin lahaayeen hay'adaha deegaanka xasaasiga ah oo ay ugu dari lahaayeen eegitaanka SSR oo ay u horumarin lahayd GSR, DMR yadeeda iyo qaababka kale ee qiimaynta iyo la socodka ee lamidka ah. Meta waa inay xaqiijisaa in Barnaamijka Diiwaan gelinta Wariyaha uu yahay isha saxda ah iyo ku biiritaanka suuqaq badan, gaar ahaan meelaha ay caburinta iyo cadaadiska dowladeed khatar ku yihiin warbaahinta madax-bannaan, oo ay ku jiraan wariyeyaasha madax-bannaan ee caan ah.

## 2. ***Helitaanka xalka***

Qodobka 2(3) ee ICCPR waxa uu waajibinayaa dawladaha inay hubiyaan in “qof kasta oo xuquuqdiisa ama xorriyaddiisa lagu xadgudbay” uu helo xal wax-ku-ool ah.’’ Tani waxay ka dhigan tahay helitaanka hannaan sax ah oo garsoor, maamul, sharci-dejin, ama hab kale oo ku habboon’’ si loo go’aamiyo xadgudubka oo loo bixiyo dhaqan gelinta xalka. Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay (UN) ayaa sheegtey in "xalalka ay tahay in si munaasab ah loola qabsado si loo tixgeliyo nuglaanta gaarka ah ee qaar ka mid ah kooxaha dadka” (Faalada Guud Lambar.31). Bayaan Loo Dhanyahay oo Xoriyada Saxaafada iyo Dimuqraadiyada ah, Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee xoriyada hadalka iyo xariyatul qawlka deegaanka waxay ku taliyaan ‘’Baraha waaweyn ee internetka ay mudnaanta siiyaan warbaahinta madax-bannaan ee tayo leh iyo nuxurka danaha guud ee adeeggooda, si ay u fududeeyaan wadahadal dimuqraadi ah,” iyo in ay “si degdeg ah oo waxtar leh u saxaan tirtirista khaldan ee nuxurka warbaahinta madax-bannaan iyo kan danaha guud, oo ay ku jiraan dib-u-eegis bini’aadmi oo degdeg ah (Talooyinka madalaha onleynka ah, bogga 8).

The Madaadii'da Haga UN ee Xuquuqda Shaqada iyo Bila Aadanka (UNGPs), oo ay ansixisay Golaha Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay sanadkii 2011, waxay dhisayaan qaab iskaa ah oo hagaya masuuliyadaha xuquuqul insaaneed ee

ganacsiyada gaarka loo leeyahay. UNGP-yada UNGPs waxay buuxisaa farqiga u dhexeeya waajibaadka dawladaha iyo masuuliyadaha shirkadaha, waxayna u adeegtaa sidii qaab muhiim ah oo lagu dabaqo xuquuqda magdhaw wax-ku-ool ah. Waxay dhiirigelisaa shirkadaha inay dhisaan ama ka qaybqaataan hannaan cabasho oo ah "mid sharciyad leh, la heli karo, la saadaalin karo, cadaalad ah, hufan, xuquuq-u-hoggaansan, isla markaana noqda ilo waxbarasho joogto ah" (Mabda'a UNGP 31). Inkast aoo sharciga xuquuqda bilaa aadanku uu sheegaya masuuliyada kowaad ee dalalka in la ilaaliyo tacadiga cida gaarka ah, UNGP-yada waxay keentay sharci barbar socda "masuuliyada xushmaynta xuquuqda bila aadanka," waxay uga baahan tahay ganacsiyada, oo ay ku jiraan madalaha, inay iska ilaaliyaan ku xad gudubka xuquuqaha iyo in laga jawaabo saamayno walboo xun. UNGP-yada waxay ku dhiiri geliyaan shirkadaha "inay sameeyaan ama ay ka qayb gelaan nidaamka cabashada heerka shaqo ee wax ku oolka ah ee shakhsiyaadka iyo bulshooyinka ay saamayn xun ku yeelan karto," (Xeerka 29) oo qaabkaas waa inuu awood u siiyo "bixinta digniinaha hore iyo ka jawaabitaanka cabashooyinka inta ay sii xumaanin" (Mabda'a 30).

Gudidu waxay fahansan tahay in khaladaad jiri karaan marka la maareynayo tafatirka xogta heer ballaaran iyada oo ay ugu wacan tahay muga, kakanaanta arrimaha, iyo xaddidaadda otomaatiga iyo garashada bani'aadamka. Waxaa sido okale uu ogyahay dadaalka la cusbooneysiiyay ee Metahttps://about.fb.com/news/2025/01/meta-more-speech-fewer-mistakes/, ee Janaayo 7, 2025, ee "hadal badan iyo khaldaad yar." Aad ayuu uga walaacsan yahay in nidaamyada racfaanka ee Meta ay ku guuldareysteen inay bixiyaan xal ku filan isticmaalaha xaaladahan. Tani waxay si gaar ah mushkilad u tahay marka la eego deegaanka daran ee saxaafada iyo saxaafada madax banaan ee Somaliland, iyo xadidaada shacabka ee helitaanka xogta ku saabsan dhacdooyinka wakhtigan ee deegaanka.

Xaqiiqda ah in naqdiye bini'aadam ah lagu amray inuu dib u eego racfaanka laga gudbiyay go'aanno uu isagu hore u gaaray waxay si weyn u wiiqaysaa hufnaanta iyo daacadnimada habka racfaanka. Gudidu waxay hore u keeneen walaacyo ku saabsan imaantinka tan (eeg go'aanka Tacadiga Dumarka Lagula Kaco), waxayna u arkaan in

cudurdaarrada la xiriira awood xaddidan ama shaqaale yar aysan ahayn cudurdaar ku filan. Ilaalin wayn oo wax ku ool ah ayaa loo baahan yahay, gar ahaan saxaafada madaxa banaan ee jooga meelaha sida Somaliland.

In kasta oo arrimahan ay soo baxeen oo keliya kadib markii isticmaalahan uu racfaan u gudbiyay Guddidu, haddana taasi waxay muujinaysaa muhiimadda ay leedahay in isticmaalayaasha la siiyo hab xal oo wax ku ool ah, waxayna iftiiminaysaa daldaloolo iyo tabar-darrooyin aasaasi ah oo ku jira nidaamyada shirkadda. Inkasta oo siddeed jeer naqdin lagu sameeyay racfaannadii la xiriiray go'aannadii nuxurka hore, natiijadii saxda ahayd lama gaarin, halka racfaankii laga gudbiyay go'aankii asalka ahaa ee lagu tiray bogga kaas oo sababay in kasaaritaanadaas aan la naqdinin gebi ahaanba. Waxay ku qaadatay Meta waqti dheer inta lagu guda jiray kiisaskan, si ay u bixiso oo keliya xog guud oo ku saabsan sababta asaasiga ah ee ka dambeeya khaladaadkan. Tani waxay muujinaysaa liidasho qaabaysan ee ka jirta qiimaynta khaladka iyo soo saaristiisa. Iyada oo Gudidu qirsan tahay taas, sababo farsamo darteed, Meta aysan u habayn qalabkeeda kormeerka si uu u qabto xog faahfaahsan oo ku saabsan go'aan-qaadashada naqdiyaha, haddana arrimaha lagu arkay kiisaskan waxay muujinayaan in tani si weyn u carqaladeyso awoodda Meta ee baarista iyo xallinta dhibaatooyinka nidaamsan ee fulinta siyaasadaha.

## 6. Go'aanka Gudida Kormeerka

Gudida Kormeerka wuxuu qaadhacay go'aankii Meta ee ahaa in la saaro afarta nuxur iyo in la joojiyo bogga, taas oo micnaheedu yahay in bogga dib loo soo celiyo si buuxda.

## 7. Talooyinka

A. <u>Siyaasda Xogta</u>

1. Si loo siiyo isticmaalayaasha faham cad oo ku saabsan xeerarka lagu dabaqo bogagga, Meta waa inay abuurtaa ilo mideysan oo ku jira Xaruntiisa Bayaaminta, kaas oo sharxaya siyaasadaha nuxurka iyo tilmaamaha fulinta, oo

ay ku jiraan nidaamka digniinta, isla markaana la hubiyo in maamulayaasha boggaga si fudud u heli karaan.

Gudidu waxay tixgelin doontaa in talooyinkan la dhaqan geliyo marka Meta ay abuurto khayraadka isku jira ee Xarunta Bayaaminta oo ay ku muujiso boodhadhkeeda maamulayaasha bogga.

B. Dhaqan gelinta

2. Si loo xaqiijiyo helitaanka xal wax ku oolka ah, Meta waa inay dib u eegid ku samayso nidaamka mamnuucitaanka naqdinta bila aadanka ee qiimaynta racfaanka ee go'aankooda, oo ay ku jirto daabicid la’aanta bogga. Tani waa in loo sameeyo qaab aan keeneynin korodh shaqooyinka naqdinta racfaanka ee sida tooska ah loo xidhay.

Gudidu waxay tixgelin doontaa in talooyinkan la dhaqan geliyo marka ay meta siiso Gudida waraaqaha xaqiijinaya in shuruucdan la cusboonaysiiyay, oo xogtu waxay muujinaysaa inayna jirin wax diidmada ah oo la xidhiidhka qiimaynta racfaanka la naqdiyay.

3. Si loo xaqiijiyo in boggaga aan si kam ah looga saarin, meta waa inay cusboonaysiisaa Naqdinteeda Labaad ee Guud (GSR) ee ku dareysa algoriidimka si loo dedejiyo go’aamada lagu joojinayo inaan la daabicin bogga loo gudbiyo naqdin gudaha ah.

Gudidu waxay tixgelin doontaa in talooyinkan la dhaqan geliyo marka Meta ay siiso gudida dukumentiyo faahfaahinaya shuruudaha cusub ee mudnaanta la siinayo, iyo sidoo kale xog muujinaysa isbeddellada la xiriira inta jeer ee go’aannada lagu tirayo bogagga lagu naqdiyo barnaamijka GSR.

4. Si loo ilaaliyo wariyayaasha ee jooga meelaha xorriyadda warbaahinta la cabburiyo, Meta waa inay soo saartaa shuruudo iyo nidaamyo cusub oo si firfircoon loogu diiwaangeliyo bogagga ama akoonnada ku hawlan suxufiyadda ee meelahan ee Naqdinta Labaad ee Hay'ada Xasaasiga ah (SSR). Heerka dadka ku xidhan waa inay habeeyaan cabirka suuqa, waxaana

shuruudaha jira ee loogu talagalay aqoonsiga ururrada warbaahinta aan loo oggolaan karin inay ka hor istaagaan gelitaanka. Maamulada lagu kalsoon yahay sida Gudida Ilaalnta Saxaafada ee jaantuska ka xoroobida ciqaabka waa in loo adeegsadaa si mudnaanta loogu siiyo deegaanada khatarta sare leh.

Gudidu waxay eegi doontaa talooyinka dhaqan gelinta marka Meta ay la wadaagto Guddiga xog iyo macluumaad oo faahfaahinaya shuruudaha cusub ee aqoonsiga ilaalinta SSR ee saxafiyiinta iyo tirada aqoonsiyada cusub ee la abuuray suuq kasta.

***Qoraal Habraac ah:**

- Go'aanada Gudida Kormeerka waxaa gaara guddiyo ka kooban shan Xubin, waxaana ansixiya codka aqlabiyadda Guddiga oo dhan. Go'aanka Gudida khasab maaha inuu yahay aragtida dhamaan Xubnaha.

- Sida ku cad Cutubka, Gudida Kormeerku waxay naqdin karaan racfaanada ka imaada isticmaalayaasha kuwaas oo waxay soo dhigeen ay Meta saartay, racfaanada ka yimada isticmaalayaasha kuwaas oo soo sheegay xogta meta ay ka tagtay, iyo go'aamada Meta ay u tixraacday (Cutubka Qodobka 2 ee Qaybta 1). Gudidu waxay leeyihiin awood sharci oo ay dhaqan gelinayaan ama ku qaadhacayaan go'aamada xogta ee Meta (Cutubka Qodobka 3, Qaybta 5: Cutubka Qodobka 4). Gudigu waxa laga yaaba inay soo saaraan talooyin aan sharciga lagu dabaqi karin oo Meta looga baahan yahay inay ka jawaabto si waafaqsan (Cutubka Qodobka 3, Qaybta 4; Qodobka 4). Meesha ay ka go'an tahay Meta inay fuliso talooyinka, Gudidu waxay kormeeri doontaa dhaqan gelinteeda.

- Go'aanka kiiskan, baadhitaan madax banaan ayaa loo xilsaaray iyada oo lagu hadlayo magaca Gudida. Gudidu waxaa caawiyay Duco Advisors, shirkad latalinta oo diirada saareysa isku xidhka deegaanada, hay'adaha amaanka iyo

teknooloojiyada.* *Adeegyada luuqada waxaa bixiyay Lionbridge Technologies, LLC, oo khabiiradeeda si faseexo ah ugu hadlaan wax ka badan 350 luuqadood oo ay ka shaqeeyaan wax ka badan 5,000 oo magaalo caalamka oo dhan ah.*